# House of Representatives Economy Committee Investigation & Analysis of the 2006 Somaliland Budget

## Gudida Dhaqaalaha oo Warbixin ka soo saaray Miisaaniyadda 2006

13/03/2006
(source: Jamhuuriya)

Guddiga Dhaqaalaha Golaha Wakiilada oo muddo afar toddobaad ah ku gudo jiray baadhitaano ay ku hubinayaan is waafajinta dakhliga ka soo xerooda ilaha dhaqaalaha iyo odoroska Miisaaniyadda dawladda ee 2006-ka, ayaa shalay golaha soo hordhigay warbixinta kama dambaysta ah oo ay ku soo ururiyeen xogo iyo macluumaad ay ku soo ogaadeen baadhitaanadooda.

Warbixinta oo uu golaha ka akhriyay guddoomiyaha guddiga dhaqaalaha **Md. Maxamed Xaaji Maxamuud Cumar Xaashi**, waxay ku iftiimiyeen madmadow iyo dhaliilo badan oo ka muuqda goobaha dakhliga ee ay baadhitaanada ku soo sameeyeen, kuwaas oo uu tilmaamay inuu ku jiro wax is dhaafdhaafin.

Madmadowga iyo dhaliilaha guddigu warbixintooda ku oo bandhigeen oo isugu jiray laba qaybood oo kala ah mid ay kaga waramayaan goobaha dakhliga iyo shaxda odoroska Miisaaniyadda ee lagu saleeyay dhaqaalaha dalka.

Waxa kale oo warbixintooda ay ku soo jeediyeen tallo soo jeedin lagu saxayo khaladaad ay soo bandhigeen.

Warbixintaas oo dheerayd waxa nuxurkeedu u dhignaa sidan:-

"**Hordhac:**

Odoroska miisaaniyadda 2006, waxaa golaha la hor keenay 01/02/2006, si goluhu uga doodo, waxna loga beddelo, loona ansixiyo sida ku cad qodobada dastuurka 53 iyo 55. Hadaba, guddida dhaqaluhu si uu helo macluumaadka dhabta ah ee dakhliga dalka wuxuu booqasho ku tegay goobo kala duwan oo dalka ah (ilaha dhaqaalaha) oo kala ah:

1. Berbera (Haamaha shiidalka iyo Total, Kastamka, Dekedda, Madaarka, Baanka, Cashuuraha bariga, wasaaradda kallumaysiga, xanaanada xoolaha iyo wakaaladaha biyaha).
2. Burco (Kastamka, Cashuuraha bariga, xafiiska xisaabiyaha gobalka).
3. Hargeysa (Kastamka, Madaarka, Cashuuraha bariga).
4. Kalabaydh (Kastamka)
5. Caynabo (Kastamka)

Waxa kale oo aanu la xidhiidhnay Ceerigaabo, Boorama, Saylac, waxa kale oo aanu xog-waraysi la yeelanay masuuliyiin kala duwan oo ay ka mid ahaayeen wasaaradda Maaliyadda, Gudoomiyaha Baanka, Wasaaradda Ganacsiga iyo warshadaha, Boosaha iyo isgaadhsiinta, duulista hawada iyo gaadiidka cirka iyo wasaarada kalumaysiga.

<u>**Xogtii la soo ururshay:**</u>

Maadaama miisaaniyadda 2006, ay tahay odoros ka kooban dakhli iyo kharash isleeg, ayaa waxay guddidu go'aansatay in loo kuur galo oo la ogaado dakhligii sannadkii 2005, si loogu saleeyo miisaaniyadda sannadkan 2006.

Hadaba, waxaanu ka soo helnay goobihii aanu tagnay xogahan oo ka kooban dhinaca dakhliga iyo talooyin wax lagu hormarin karo oo la socota xog walba:

**B. KASTAMADA**

Kastamada dalka oo dhan waxaa ka soo baxay sannadkii tegay ee 2005 – 169,535,608,825
Cashuuraha bariga oo dhan waxa ka soo baxay – 13,343,028,011
Wasaaradaha iyo Dekedda 3, 142.332.000
Total. 186,020,968,836
Odoroska miisaaniyadda ee 2005, 148,252,211,709
Farqiga 37,868,757,127/-

Hadaba, lacagtan waxa ku jirta kabka dawladaha hoose ee dhan 12,5% iyo tan dawladaha hoose (M. tax ama curaarta) 10% oo isku darkoodu noqonayo 37,000,000,000/- Sol. Sh.

Waxa xaqiiqo ah in lacagtani sidii loogu tala galay oo wanaagsan u gaadhin meelihii loogu talo galay.

Tusaale ahaan magaalada Hargeysa waxa gaadhay 130,000,000 halka ay noqonayso inta ay ka heleen lacagtii curaarta oo keliya 10% 465,443,365 magaalada Burco waxa gaadhay oo kaliya 377,000,000.

Lacagta adag oo ku jira dhakhliga inna soo gala waxa uu dhamaa sannadkii 2005, $7,936,230.

Lacagta adagi waxay dakhliga dalka ugu jirtaa qiimaha sarrifka rasmiga ah (official rate) oo ah 3500 Sol. Sh halkii doolar $. Waxaana loo isticmaalaa lacagta adag in lagu bixiyo raashinka ciidamda qaranka, safarada debedda, wakiilada safaaradaha dibedda iyo qalabka ciidanka.

Hadaba, halkan nidaaamka labada sarrif waxa dhexdooda lagu waayaa lacag.

Markaas waxaanu isla garanay in ay jiri karto lacag siyaado ah (Surplus) oo ka soo hadhi doonta miisaaniyaddii 2005. waxaana waajib ah marka la soo dhameeyo xisaab xidhka sannadkii 2005 ee wixii lacag ee dheeraad ah lagu kabo miisaaniyadda cusub ee 2006, iyadoo loo samaynayo supplementary Budget.

**Talo soo jeedin:**

1. Si loo saxo nidaamka lacagta adag ee dalka, waxanu soo jeedinaynaa sidan:

§ In la cagtani ku dhacdo account gaar ah oo maaliyaddu iska leedahay oo ah kuwa 08.

§ In lacagtan lagu qabto jiiwanada ay leedahay wasaaradda maaliyaddu

§ In lacagtani ku baxdo foojar uu saxeexay xisaabiyaha guud sida lacagaha shilinka Somaliland.

§ In lacagta adagi ka muuqato xisaab xidh kasta oo halkaa si wanaagsan looga arko dakhliga iyo kharashka lacagta adag.

2. Si lacagta kabka ahi u gaadho degmooyinka, waxaanu soo jeedinaynaa sidan:-

§ In laga wareejiyo maamul ahaan lacagaha kabka wasaaradda Maaliyadda kadib markay soo xarayso.

§ In loo sameeyo account gaar ah oo ay xisaabtani leedahay

§ In ay maamulka lacagtaasi hoos timaado guddi ka kooban todoba xubnood oo ka kala socda golayaasha deegaanka saddex qof, guddiga dhaqaalaha laba qof iyo wasaaradda arrimaha gudaha laba qof.

§ Guddigani waxay masuul ka noqonaysaa hubinta iyo daba galka kabka.

3. Dhakhliga dalku wuxuu 80% ka soo baxaa katamada Kala-baydh iyo Berbera. Hadaba, loo kordhiyo dakhliga waxa muhiim ah in la abaabulo olole wacyi gelin ah oo dadka lagu dhiiri galinayo inay cashuurta bixiyaan siiba cashuurtqa bariga.

4. Dhakhliga soo xarooda waa in wax loogu qabtaa bulshada baahiyaheeda sida caafimaadka biyaha korontada wadooyinka waxbarashada iwm.

**X. Baanka:**

Guddidu waxay xog waraysi la yeelatay Guddoomiyaha Baanka Somaliland si ay wax uga ogaato shaqadiisa gaar ahaan qaabka adeegga lacagta adag iyo shaqadiisa guud ahaan.

Waxa uu guddoomiyuhu noo sheegay in Baanku yahay hay'add madaxbanaan sida ku cad dastuurka. Wuxuuna ku socodsiiyaa hawshiisa khidmadaha (service charges) uu ka qaado macaamiishiisa.

Hay'adaha caalamiga ah ee ku sugan Somaliland ma dhigtaan wax lacag ah habayaraatee Baanka, waxaanay isticmaalaan xawaaladaha dalka. Sidaas darteed, wuxuu adeegiisa u fidiyaa oo keliya shaqaalaha dawladda iyo macaamiil aan tiro badnayn oo ka socota dadweynaha.

Guddoomiyuhu waxa uu noo sheegay in uu isagu xil iska saaray daabacaadda lacagta shilinka Somaliland, lana soo marin golaha wakiilada si ay u ansixiyaan. Waxaana loo baahan yahay lacag adag si loo soo daabaco lacagta shilinka Somaliland, taas oo hadda loo baahan yahay lacag ku dhaw $13,000,000 si lacagteena wareegaysa loo gaadhsiiyo kharashkeedu daboosho daalac fara badanina u soo hadhaan bulshada iyo baahiyaha Somaliland.

Dakedda Berbera waxa u dhigma oo kale lacag lagu magacaabo macaash ama faa'iido oo dhan sidan:-

2001. 796,425,00sl/sh
2002. 252,163,612sl/sh
2003. 166,340,712sl/sh
2004. 890,797,600sl/sh
2005. 156,072,900sl/sh
2006. 160,057,706sl/sh

lacagtu waxa ay u muuqataa faa'iido dakeddu soo saartay hase ahaatee ma cadda sida loo isticmaalayo iyo sanduuqa ay ku dhacayso toona. Mar la waydiiyay maareeyaha Eng. Cali Cumar Maxamed (Xoor-xoor), waxa uu sheegay in waxa ka soo baxa dakedda ay u madax banaan yihiin.

Sida uu qorayo lifaaqa warbixinta dakedda Berbera waxa jira lacag loo qoondeeyay iib inta qalabka waawayn ee dakeddu ku shaqayso ma jirin qalab la iibsaday oo muuqda, waxay sheegeen in sannadihii ina dhaafay ay lacag u kaydinayeen waliba waxa maareeyaha dakeddu carabka ku dhaftay in uu hayo ilaa saddex boqol oo kun oo doolarka Maraykanka ah, si dakedda qalab loogu iibiyo marka la isku geeyo lacagta loo qoondeeyay iibinta qalabka waa lacag ka badan inbadan lacagta la sheegay in loo hayo dakedda, imikana waliba waxa soo xarooday lacag faa'iido ah oo dhan 2.261,449,824sl/sh, lacagahaasi kuma cadda miisaaniyadda sannadihii ina dhaafay xisaab xidhna looma soo gudbin.

Waxa intaa dheer dakedda Berbera lagama soo gudbin wax xisaab xidh ah guud ahaanba, dakedda Berbera way madaxbanaan tahay.

Dakhliga dakedda Berbera waxa loo qaybiyaa saddex madax oo kala ah:-

1. Port charges
2. Stevedoring commission
3. Handling charges

Saddexda madax waxa hada qaada maamulka dakedda, hase yeeshee, dakedaha caalamku ama kuwa jaarkeena ah waxay lacagtaasi ku dhacdaa khasnadda dawladda dhexe, sidaa darteed mustaqbalka waxa aanu rajaynaynaa inay sidaas oo kale noqoto.

Dakedda Berbera waxa ku soo xidhay doonyo iyo maraakiib gaadhaya 393, haddii xaga culayska iyo miisaanka ay sidaan la xisaabiyo wuxuu gaadhayaa 513,420tons.

Dakedda Berbera waxa ka soo baxa dakhli ka badan kay soo qortay guddiguna baadhis dambe ayuu ugu noqon doonaa.

**<u>Talo soo jeedin</u>**

Maadaama dakedda Berbera ay tahay laf dhabarta wax soo saarka dalka waxa lama huraan ah in la qaado talaabooyinkan soo socda:-

1. Balaadhinta maamulka dakedda, lana sameeyo hab furan oo loola xisaabtami karo.

2. In dakeddu soo gudbiso xisaab xidh sannadeed la muddo ah miisaaniyadda qaranka.

3. In dakeddu fudaydiso hawlaha adeega ay u hayso bulshada ganacsatada iyo isticmaalayaasha dakedda uguna dhamaystirto muddo gaaban oon ka badnayn laba maalmood.

4. In maamulka kastamka uu la ogaado maamulka dakedda, waxsoosaarka dakedda ka soo baxa oo tafatiran si ay u ahaato mid lawada ogyahay.

5. In dakeddu wada shaqayn la yeelato guddiyada golaha wakiilada ee shaqo iyo farsamo ahaan la xidhiidha.

6. In hantida ka dhoofta ama ka soo dagta ay wada ogaadaan hay'adaha ku shaqada leh sida dakedda, kastamka, ganacsiga, xanaanada xoolaha.

7. In qalabka dajinta iyo badda oo aan u liita la'aanteedna aanay shaqo soconayn dayac tir lagu sameeyo iibsiga qalabka cusubna lala ogaado.

8. In sharci loo sameeyo dhamaan hay'adaha madaxa banaan sida dakedda, Baanka, wakaaladaha biyaha, korontada iyo wixii la mid ah.

**T. HAAMAHA SHIIDAALKA**

Waxa guddiga dhaqaaluhu soo mareen haamaha shiidaalka ee ay maamusho shirkada TOTAL.

Shirkadda TOTAL waxa haamaha lagu wareejiyay sannadkii 1998, iyaga oo heshiis lagu dayac tirayo la galay dawladda Somaliland, inkasta oo ay goldaloolooyin ka muuqdaan, heshiiskaasi waxa uu haamaha oo dhan 23 hada ka shaqeeya 12 si wanaagsan loo dayac tiray lana gaadhsiiyay heer caalami ah marka loo eego dhinaca nabadgalyada, dab-damiska iyo qaabkooda shaqo, waxa kale oo ay shirkaddu dayac tir ku samaysay dhuuntii shiidaalka ee ilaa madaarka Berbera, kadib markii ay dayac tirtay labadii haamood ee madaarka, waxa kale oo ay halkaa ka qoday ceel biyood oo soo saara biyo, waxaanay geysay mashiin wayn oo dab dhaliye ah, markaas labadaba waxa looga faa'iidaysanayaa madaarka Berbera oo baahi wayn u qaba biyo iyo dab ama laydh.

Hase yeeshee, marka ugu horaysa wasaaradda ganacsigu wax xafiis ah kuma laha shirkadda dhexdeeda si loo sugo tayada shiidaalka ay shirdaddu keento si ay ula socoto maal gashiga joogtada ah ee ay shirkaddu samayso iyo si ay u ilaaliso heshiiska dhexmaray shirkadaha wadaniga ah iyo TOTAL.

Marka laga soo bilaabo dayac tirkii ugu horeeyay ee ay shirkadu ku samaysay haamaha oo dhamaa 3.6 milyan Doolar iyo samayntii dhuunta badda hoos marta oo isna lagu sameeyay lacag dhan 3.5 milyan Euro ma jirto cid og xisaabta dhabta ah ee u dhaxaysa shirkadda TOTAL iyo Somaliland kadib markii ay ka cudur daarteen lababa wasaaradood ee kala ah wasaaradda ganacsiga iyo wasaaradda maaliyadda, waxaanay shirkadda TOTAL noo sheegtay in hadana wax maal galin ah aanay samayn iyaga oo aan ogolaansho ka helin xukuumadda Somaliland.

Waxay haamuhu hada ku kiraysanyihiin $36,000 inkasta oo wasiirka maaliyaddu sheegay in la kordhiyay kiradii haamaha oo laga dhigay $300,000, waxaana la socota lacagta dulsaarka shiidaalka ee ay shirkaddu iibiso kana kooban lacag cashuur ah oo dawladda loo shubo ku magacaabaana lacagta ay shirkadda TOTAL u goosoto maal galinteeda.

Batroolka: $14/foosto ($7.6 dawladda, $4.6 TOTAL, $1.8 sixid la siiyo TOTAL).

Dhiisalka: $11.6/foosto ($6.7 dawladda, $3.6 TOTAL, $1.3 sixid la siiyo TOTAL).

Waxa xusid mudan in guddigu indhahooda ku soo arkaan dhuubihii daxalaystay oo dhexyaala shirkadda iyo biriishkii dhuumihii hore oo si xun u daxalaystay oo sii dhacay.

**Talo soo jeedin**

1. Waxa waajib ah in si cad loo ogaado maamul ahaan wixii khuseeya TOTAL, si loo saxo dhamaan wixii mugdi ku jiro.

2. In si rasmi ah loo ogaado halka ay marayso xisaabta u dhaxaysa shirkadda TOTAL iyo Somaliland.

3. In xukuumadda Somaliland adeegsato khubaro ajanabi ah ama xeel dheerayaal wadani ah si ay u hubiso maal gashiyada joogtada ah ee shirkadda.

4. In golaha wakiilada la hor keeno wixii heshiisyo ee ku gadaama shirkadda iyo xukuumadda si loog doodo loona ansixiyo.

5. In wasaaradda ganacsigu xafiis ku yeelato shirkadda dhexdeeda, si ay u sugto tayada shiidaalka dalka soo galaya, iyada oo adeegsanaysa xeel dheerayaal wadani ah ama ajnabiya, isla markaana xogogaal u noqoto hawl u socodka shirkadaha wadaniga ah.

**Miisaaniyadda sannadka 2006**

Miisaaniyadda sannadkan 2006, oo dhan 164,669,033,000sl/sh, kana kooban dakhli iyo kharash isleeg, ayaa waxa ay leegtahay miisaaniyaddii sannadkii 2005 oo loo geeyay korodhkeedii, taas oo muujinaysa in sal looga dhigay dakhligii sannadkii hore laakiin aan waxba lagu kordhin.

Miisaaniyadda sannadkan malaha siyaasad cad oo laga duulayo marka loo eego lacagaha loo qoondeeyay wasaaradaha iyo hay'adaha dalka, waxa kaliya ee lagu garan karaa haddii aad loogu fiirsado miisaaniyadda 2006 in lacagta ugu badan loo qoondeeyay dhinaca nabadgalyada taas oo dhan 46.82%, waxaanay kala yihiin ciidamada qaranka 25.4%, ciidamada booliska 5.95%, ciidamada asluumbta 4.08% iyo ciidamada ilaalada xeebaha 1.09% iyo wasaaradaha gaashaandhigga 5.2% iyo wasaaradda arrimaha gudaha 5.1%.

Waxa kale oo laga garan karaa saddexda qeybood ee dalka taladiisa hayaa ee kala ah madaxtooyada (Madaxweynaha 1.6%, madaxweyne ku xigeenka 0.7%, wasaaradda madaxtooyada 7.6%), sharci-dajinta oo ah golayaasha wakiilada (3.6%) iyo guurtida (2.4%) iyo maxkamadaha (maxkamada sare 0.38%, maxkamadaha hoose 1.84%, wasaaradda caddaaladda 0.27% iyo xeer ilaalinta guud 0.39%), ayaa iyana lacagta loo qoondeeyay dhantahay 18.78%.

Hadaba wasaaradaha adeega bulshada oo ahmiyad wayn ugu fadhiya sida wasaaradda waxbarashada (5.3%) iyo caafimaadka (3.3%), ayaa miisaaniyadoou aad u hoosaysaa loona baahan yahay in la kordhiyo miisaaniyadda soo socota.

Waxa sidoo kale aad u liita wasaaradaha wax soo saara ee loo baahnaa in khayraadka dhulkeena ku jira waxbadan ka qabtaan oo horumariyaan sida wasaarada beeraha oo iyaduna ah (0.74%), wasaaradda kaluumaysiga (0.76) iyo wasaaradda macdanta iyo biyaha oo ah (0.48%), waxa kale oo iyanga wax yar lagu celiyay dadka reer guuraaga ah oo laf dhabar u ah dhaqaalaha dalka isla markaana ah 70% dadka reer Somaliland, waxaana loo qoondeeyay tusaale ahaan sida wasaaradda xanaanada xoolaha (0.8%) iyo wasaaradda hormarrinta reer miiga oo ah (0.66%).

Wasaaradda ugu badan miisaaniyadda 2006, waxa weeyi wasaaradda madaxtooyada oo leh 7.6%, taas oo ka badan dhamaan wasaaradaha adeega bulshada iyo wasaaradaha cuntada iyo biyaha.

Waxa iyana ah qodob muhiim ah iyada oo markii ugu horaysay loo qoondeeyay mashaariic guud oo horumarineed dalka oo ku jirta miisaniyadda 2006, taas oo dhan 6.24%.

Hadaba, si loo siiyo saami cadaalad ah wasaarad kasta ama hay'ad kasta, ayaa waxa ay guddigu isla garatay inay u baahantahay wakhti dheeraad ah oo ku filan in la hor tago mid kasta, sidaas darteed, wakhtiga oo kooban darteed iyo iyada oo miisaaniyddu markii hore muddo dhaaftay ayaa suurto gal ka dhig waayay inaanu gudo galno sida hada loo qoondeeyay laakiin waxay guddiga iyo wasaaradda maaliyaddu isla garteen in miisaaniyadda 2007 la isla bilaabo goor hore oo wada shaqayn buuxdana lala yeesho.

Kadib markii guddiga dhaqaaluhu soo dhamaysteen safaradoodii iyo milicsiga qaabka loo dhigay miisaaniyadda sannadkan 2006, ayaa guddigu waxay meel isla dhigtay istiraatiijiyadda qorshaysan oo ay ka duulayso kana koobnaa:-

1. In korodhsiimo lagu daro miisaaniyadda sannadkan 2006, ee hortaala golaha.

2. In la helo oo loo qorsheeyo meelaha ay ka imanayso dakhliga korodhsiimada.

3. Si loo helo dakhli iyo kharash isu dheeli tiran oo miisaaniyadda lagu daro ayaa guddigu isla garatay in shaqaalaha loo kordhiyo mushaharkooda korodhsiimada.

Annaga oo ka duulayna qodobada kor ku xusan, ayaa guddigu soo diyaarisay meelaha laga kordhin karo miisaaniyadda sannadkan 2006, waxayna hagaysaa wasaaradda maaliyadda si ay isula jaan qaadaan oo aragti midaysan ka yeeshaan sidii looga dhabayn lahaa istiraatiijiyadda ay soo jeexday guddigu kadib markii dhawr jeer ay kulano isugu yimaadeen labada dhinac ee kala ah wasaaradda maaliyadda oo uu hogaaminayo wasiirka maaliyadda, agaasimaha guud, xisaabiyaha guud, agaasimaha qaybta miisaaniyadda, agaasimaha lacagta iyo dhinacyo kale oo ah guddiga dhaqaalaha ee golaha wakiilada, ayaa ugu dambayntii la isku afgartay qodobada soo socda:-

1. Inay ka yeeshaan wada shaqyn buuxda dhinaca miisaaniyadda 2006 iyo diyaarinta miisaaniyadda soosocota sannadka 2007 lana bilaabo diyaarinteeda bisha Ogos ee sannadka 2006.

2. In guddiga dhaqaaluhu kala hawl galaan sidii loo kordhin lahaa oo loo kobcin lahaa dakhliga dalka.

3. In si talo wadaag ah oo wada jir ah looga wada hawl galo diyaarinta wixii xeerar qabyo ah ee looga baahan yahay kordhinta dakhliga dalka iyo kuwii u baahan dib u eegis.

4. In miisaaniyadda sannadka 2006, lagu kabo koradh dhan 10,147,442,400sl/sh oo ku iman doona Suplemantary Budget oo laga bilaabi doono bisha July sannadkan 2006.

5. In korodhsiimadan loogu kordhiyo mushaharka shaqaalaha iyo ciidanka laga bilaabo bisha July ee sannadkan waxayna koradhsiimadani u dhigantaa 30% mushaharkooda.

6. In cisbitaalada magaalo madaxyada gobalada la siiyo caawimo dheeraad ah, marka uu hirgalo Suplemantary Budget.

Waxa kale oo meel la isla dhigay meelaha la qorsheeyay in dakhligan dheeraadka ahi ka yimaado oo kala ah:-

1. In la kordhiyo cashuurta Jaadka, iyada oo la yaraynayo qaybta xashiishka loogu talo galay, waxaana miisaanka lagu kordhinayaa 10%, waxaana laga filayaa dakhli dhan 2.5,45,488,450sl/sh.

2. In laga qaado shirkadaha isgaadhsiinta dalka cashuuraha ku waajibay, waxaana laga filayaa 12.240,000sl/sh.

3. In laga qaado kirooyin kaalmaha shiidaalka ee dawladdu leedahay, waxaana laga filayaa dakhli dhan 245,400000sl/sh.

4. In la soo xareeyo macaashal macaashka ganacsiga iyo daaraha waxaana laga filayaa dakhli dhan 2.195,790,921sl/sh.

5. In la soo xareeyo macaashal macaashka xawaaladaha waxaa laga filayaa dakhli dhan 624,610,000sl/sh.

6. Cashuurta tigidhada diyaaradaha, huteelada la seexdo, hay'adaha madaxabanaan, shirkadaha ganacsiga iyo hay'adaha caalamiga ah iwm, waxa laga filayaa dakhli dhan 2,950,534,047sl/sh.

7. Lacagta dheeriga ah marka laga sameeyo xisaab xidhka 2005, waxa laga filayaa in la helo lacag buuran oo lagu daro kabka miisaaniyadda.

8. In kabka degmooyinka laga jaro 4.5% oo lagu daro kabka miisaaniyadda oo loona daayo 8%.

9. In la kordhiyo taakulada maalgalinta ay dakeddu siiso dawladda dhexe lana gaadhsiiyo 3,000,000,000sl/sh.

Waxa kale oo guddiga dhaqaaluhu isla gartay talooyinkan soo socda:-

1. In hanti dhawraha guud ee qaranku u shaqeeyo si madax banaan oo ah sida ku cad dastuurka, isla markaana uu soo gudbiyo xisaab xidhada xilliga ku haboon.

2. In dhamaan cabashooyinka ay noo soo gudbiyaan wakaaladaha, wasaaradaha iyo hay'addaha dalku si qoto dheer loo tix galin doono miisaaniyadda 2007 oo wakhti yari innaga xigo.

3. In dib u habayn lagu sameeyo tirada wasaaradaha dalka oo la isku cel celiyo intii shaqo ahaan isqaadan karta si loo yareeyo kharashka ku baxa maamulka wasaaradaha, isla markaana kor loo qaado adeegyada bulshada.

4. In sharciyo loo sameeyo dhamaan hay'adaha iyo wakaaladaha madaxa banaan, isla markaana dakhligooga iyo kharshkooguba ka muuqdaan miisaaniyadda ayna sameeyaan xisaab xidh sannad kasta.

5. In la mideeyo dhamaan tacriifadaha laga qaado kastamada dalka oo dhan.

6. In sameynta miisaaniyadda 2007, ay wada jir uga hawlgalaan guddiga dhaqaalaha ee golaha wakiilada iyo wasaaradda maaliyadda.

7. In la sugo tirada dhabta ah ee ciidanada iyo shaqaalaha dawladda inta aan la gaadhin diyaarinta miisaaniyadda 2007.

Hadaba waxaanu u soo jeedinaynaa golaha in ay ansixiyaan miisaaniyadda sannadkan 2006, oo inta badan shaqada qaranku u baahan tahay".

Jamhuuriya Online